



Qaramada midoobay oo
**QARAMADA MIDOOBAY OO U DABBAALDAGAYSA MAALINTA HAWEENKA
CAALAMIGA AH EE 2009**

**Ragga iyo wiilashuba waa inay kaalin mug leh ka qaataan ciribtirka
xad-gudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha Soomaaliya**

Nairobi, 8 March 2009 – Ragga Soomaalida – yar iyo weynba – waa inay wadajir ahaan ugu halgamaan ciribtirka xad-gudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha.

Dalka Soomaalida, haween iyo gabdho fara badan ayaa ah dhibanayaasha aamusan ee xad-gudubyada, dadka sharci-darrada lagu dhoofiyo, jir-dilka, kufsiga,guursiga da'yarta iyo Gudniinka fircooniga ah. Waxayna xad-gudubyadaasi horseedaan dhimasho, xanuun, curyaannimo iyo laxaw murugo leh. Inta badan haweenka iyo gabdhuhuba ma helaan fursado ay ku soo bandhigaan dhibaata dooda, iyadoo kuwa badan oo iayaga ka mid ahna ay door-bidaan aamusnaanta iyagoo ka cabsanaya in la cambaareeyo ama ay qoysaskoodu dilaan. Inta badan xad-gudubyadaas waxaa lagu daboolaa aamusnaanta iyadoo ay aad u yar tahay inta la ciqaabo.

“Xad-gudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhuhu ma ahan arrin u gaar ah haweenka, waase arrin guud oo dhammaanteen ina khusaysa.. Mana jirto caado, dhaqan ama diin caddayn u haysa falalka gurraacan iyo adeegsiga xaqiraadda ku dhisan.”, sidaas waxaa yiri Mark Bowden, Isku-duwaha Hawlaha Bini'aadinnimada QM ee Soomaaliya.

Sannadkan, waxaa maalinta Haweenka Caalamiga ah, dunida looga dabbaaldegayaa 8 March 2009, iyadoo loogu baaqayo fursad ay si wadajirka ah raga iyo haweenkuba ugu hawlgalayaan sidii ay dadweynaha ugu soo jeedinlahayeen xad-gudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha. Dhab ahaantii xad-gudubyadan ka dhanka ah haweenka iyo gabdhuhu ma ahan oo keliya xad-gudub guud oo loo gaysanayo xuquuqda aadamiga, balse wuxuu xambaarsan yahay hadimooyin fara badan oo isugu jira dhinacyada dhaqaalaha iyo bulshada, kuwaasoo xaqiraad weyn ku haya horumarka, nabadgelyada iyo ammaanka haweenka. Intaas waxaa dheer, iyadoo lid ku ah sharciga caalamiga ah ee bini'aadinnimada,islamarkaana dhiirigelinaya anshax-xumo halis ku ah xaqiijinta himilooyinka horumarinta caalamiga ah sida; Himilida Horumarinta Millennium-ka

Haddaba waa inay si wadajir ah uga wada qaybgalaan soo bandhigidda mudnaanta ay arrintaas leedahay dhammaan qaybaha kala duwan sida; dawladada, bulshada rayidka ah, ururrada haweenka, ururrada ragga, kooxaha dhallinyarada, hay'adaha gaarka loo leeyahay/ waaxda gaarka ah, qaybaha warbaahinta iyo shakhsiyaadka

raga iyo haweenka ah oo ay weheliyaan hay'adaha QM. Waxaan u baahanahay inaan la dagaallanno dhammaan dhaqammada iyo caadooyinka weji-gabaxa leh sida u-dul-qaadashada, u-qiil-bixinta(U-cudur-daarka) ama iska-indha-tirka xad-gudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha. Waana in shuruucda heer qaran ay si hufan u qeexdaa, una xoojisaa meel-marintooda, iyadoo ciqaabta ay mudan yihiin lala tiirsanayo dhammaan qaababka kala duwan ee xad-gudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha.

Waxayna QM si joogto ah u sii wadi doontaa taageerada ololayaasha maxalliga ah iyo hawlaha abaabulka bulshada ee Soomaaliya, kuwaasoo ujeeddadoodu tahay ciribtirka iyo ka hortagga xad-gudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha. Tan waxaa ka mid ah sidii fursado iyo taageeraba loo fidin lahaa haweenka iyo gabdhaha lagu xad-gudbay, kuwasoo lagu sii xoojinayo hab-raacyada xarumaha gudbinta ee imminka jira iyadoo loo ololaynayo xaqiijinta qaabka dulqaadasho la'aanta(zero-tolerance) ee xad-gudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha.

Wixii faahfaahin dheeraad ah fadlan booqo shabakadda www.endviolence.un.org